



**GUDDIGA DOORASHOYINKA
DAWLADDA PUNTLAN EE SOOMAALIYA**

**WARBIXIN SANNADEEDKA
2022-2023**

May, 2024

TUSMADA GUUD

| | |
|---|-----|
| TUSMADA..... | i |
| KU SAABSAN GUDDIGII KMG DOORASHOOYINKA PUNTLAND..... | ii |
| KALMADDA GUDDOOMIYIHII GUDDIGA KMG..... | iii |
| 1. HORDHAC..... | 1 |
| 2. WACYIGELINTA IYO TABABARADA..... | 2 |
| 2.1 Falanqaynta Aaladda facebook maalintii Doorashada | 3 |
| 2.3 Falanqaynta Aaladda Twitter maalintii Doorashada..... | 4 |
| 2.4 XARUNTA WICITAANKA DADWEYNAHA | 4 |
| 3. SAHMINTA IYO QIIMAYNTA GOOBAHA | 5 |
| 4. DIIWAAN-GELINTA MUWAADINIINTA | 7 |
| 5. DAABACAADDA IYO QAYBINTA KAARARKA | 11 |
| 6. QABSOOMIDDA DOORASHADA..... | 12 |
| 6.1 OLOLAHA DOORASHADA | 12 |
| 6.2 SHAXDA OLOLAHA URURADA SIYAASADDA PUNTLAND | 12 |
| 6.3 LIISTOOYINKA MUSHARAXIINTA IYO AAG-DOORASHOOYINKA..... | 13 |
| 6.4 MAALINTA DOORASHADA..... | 14 |
| 6.5 KU DHAQAAQIDDA NATIJJADA | 14 |
| 7. AMNIGA, SAADKA IYO GAADIIDKA | 17 |
| 8. ISKAASHIGA DANEEYAYAASHA DOORASHADA..... | 17 |
| 9. CASHARADII LAGA BARTAY DOORASHADA..... | 18 |
| 10. CAQABADIHII DOORASHADA | 19 |
| 11. TALA SOO JEEDINTA | 20 |
| 12. MILICSIGA DOORASHADA | 21 |
| 13. Lifaaqa 1-Aad: SAWIRADA 2021..... | 22 |
| 14. LIFAAQA 2-AAD: BAHWADAAGTA GKDPL..... | 25 |
| 15. LIFAAQA 3AAD: JADWALKA DOORASHADA | 26 |

KU SAABSAN GUDDIGII KMG DOORASHOYINKA PUNTLAND

Guddigii KMG Doorashooyinka Puntland (GKDPL) oo ahaa guddigii 3^{aad} waxaa si rasmi ah u ansixiyay Baarlamaanka Puntland 16-kii November 2019, waxaana loo aasaasay qabashadda shaqooyinkan soo socda oo kala ah: u-samaynta siyaasadda, maamulidda iyo qabashadda doorashooyinka dowladaha hoose, diiwaan-gelinta ururadda siyaasadda, diiwaan-gelinta muwaadiniinta codeyn kara, diiwaan-gelinta iyo shahaadasiinta urur siyaasadeedyada ku guuleysta kadib qabashadda doorashooyinka dowladaha hoose iyo dhameystirka dhammaan shaqooyinka kor ku xusan. Guddiga KMG doorashooyinku waxuu jidka u sii xaarayey Guddiga rasmiga ah ee doorashooyinka Puntland.

Guddiga Doorashooyinka KMG ee Puntland wuxuu ka koobnaa 9 xubnood oo ay hogaaminayeen Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenkiisa iyadoo loo xil saaray jihaynta siyaasadda iyo korjoogtaynta istiraatiijiga ah. Waxay ansixiyaan siyaasadaha, qawaaniinta, xeerarka anshaxa iyo tilmaamaha ku socda xoghayaha guud, agaasimayaasha, howl-wadeenada xarunta dhexe iyo masuuliyiinta doorashooyinka kumeel gaarka ah ee gobolada, degmooyinka, goobaha diiwaan-gelinta iyo cod-bixinta.

Laga soo bilaabo 2019-kii, Guddigu wuxuu dhaqan galiyay waajibaadkii loo igmaday oo ay ka mid ahaayeen diyaarinta, abaabulka iyo kormeerka doorashooyin xor iyo xalaal ah oo ka dhaca deegaannada Puntland iyo u soo gudbinta cod-bixiyeyaasha natiijada dhabta ah ee doorashada taa soo ka maran eex iyo wax isdaba-marin. Guddigu wuxuu 2021 hirgaliyay doorashada 3dex dagmo (Qardho, Eyl iyo Ufayn) oo hordhac ah loogana gol-lahaa in laga barto casharo gogol-xaar u noqda laguna dabakho doorashada degmooyinka kale.

25 May 2023 Guddigu wuxuu dhamaystiray Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka wuxuuna si guul ah doorashooyin hufan uga qabtay 30 Degmo.

31-dii Bishii July, 2023 waxaa soo gabagaboobay muddo xileedkii Guddiga kadib markii uu cod aqlabiyad ah ku ansixiyey 8 Xisbi-siyaasadeed iyadoo Hay'aduna noqotay Guddiga rasmiga ah ee doorashooyinka Puntland

Guddiga KMG ahaa wuxuu 27 September 2023 si rasmi ah ugu wareejiyey xilka Guddiga rasmiga ah ee Doorashooyinka Puntland iyadoo allena uga baryey inuu ku guuleeyo hawlaha culus ee horyaala guddiga cusub oo ay ugu horayso inay wadanka ka qabtaan doorashooyinka madaxtooyada iyo Baarlamaanka horaanta sanadka 2024.

KALMADDA GUDDOOMIYIHII GUDDIGA KMG

BISMILLAH,



Guddiga KMG ah ee doorashoyinka Puntland wuxuu ku faraxsanyahay inuu hirgaliyey 25 May 2023 doorasho xor iyo xalal ah taas oo noqotay doorashadii ugu horaysay ee qof iyo cod ah oo ka qabsoonta Somalia mudo ka badan 50 sano marka laga reebo 3-dii Degmo ee Guddigu sida hordhaca u qabtay, iyadoo ku soo aaday sanad guurada 25^{aad} ee dhismaha dowladinamada Puntland.

Waxaan markii u horasay xaqiijinay hirgalinta himiladii lagu asaasay Puntland taas oo ahayd imtixaan laga gudbiweyey mudo 25 sano ah, sida ku cadayd axdigii lagu asaasay Puntland waxay ahayd

in dadku soo doortaan golayaasha dowladda ee Puntland mudo sadex sano gudohood ah iyadoo sidoo kale lagu ayiday dastuurka Puntland ee 2012.

Guddigu wuxuu dhamaystiray dhaman masuuliyadii saarnayd guddi ahaan ee uu u xilsaaray Dastuurka dowladda Puntland iyo xeerka guddiga doorashoyink taas oo ka koobnayd:

1. Samaynta iyo dhamaystirka xeerarka doorashoyinka dowladaha hoose
2. Diiwan-gelinta iyo sharciyeynta ururada siyaasadda
3. Waxbaridda dad-waynaha ee Doorashooyinka
4. Tayeynta iyo taabagelinta Hay'adda doorashada iyadoo loo dhamaystiray shaqaale iyo agab-ba
5. Diiwaangelinta muwaadinninta iyadoo la adeegsanyo hanaan casri ah oo la jaan-qaadaya technologyda cusub.
6. Dhisidda kalsonida daneeyayaasha doorashada gudo iyo dibadaba.
7. Qabashada doorashada dowladaha hoose iyadoo la doortay golayaasha degaanka 33 degmo halka 37 degmo diiwangelin laga sameyey, 40 degmona seejeeyinka codaynta la diyaariyey.

Waxaa ifarxad-gelinaysa ka guddomiye ahaan inaan hogaamiyey hanaan doorasho oo baaxadaa leh iyadoo ay jiraan caqabado badan oo la xiriray dhinaca fahamka doorashada oo yaraa, siyaasadda oo aan deganayn, amniga oo caqabado ka jireen, isku dayo hore oo fashilmay balse ay qabsoontay doorasho hufan oo aan wax cabasho ah ka imaan ururadii tartamay iyo musharixiintooda taas oo ahayd mid daah furan dhamaan daneeyayaashuna ay ula socdeen si furan.

Waxaan u mahadceliyay guddiga KMG doorashoyinka Puntland ee ila soo shaqeeyey, hawl wadenada xarunta dhexe ee Guddiga, kuwa goboloda, kuwa degmoyinka shaqaalaha goobaha, ciidanka amniga hay'adaha maxaliga ah ee daneeya doorashadda, hay'adaha calimaga ah ee naga kabay dhaqaalaha doorashada, xukumadda Puntland oo uu ugu horeeyo madaxwaynaha dowladda Puntland oo si wanaagsan noolashaqeeyey, shacabwaynaha Puntland iyo dhamaan intii nala soo shaqaysay.

Wabillaahi Tawfiiq.

C/RISAAQ AXMED SICIID

Guddoomiyaha GKDPL

1. HORDHAC

Warbixintan waxaa xoogga lagu saaray hawlihii doorshada goleyaasha deegaanka ee May 2022 ilaa May 2023 taas oo ka qabsoontay **398** seejo iyo 30 degmo oo ka mida dagmooyinka Puntland. Mudada shaqada doorashadu socotay waxaa ka qayb-qaatay **30,705** qof oo isugu jira **5,231** hawl-wadeen, **378** korjooge, **4,000** oo wakiil Urur-siyaasadeed iyo **2,669** oo shaqalaha gaadiid ah. Waxaa kale oo xusid mudan in ay hawl-galkan doorashada ay qayb laxaadleh ka qaateen saraakiil iyo hawl-wadeeno amni oo tiradoodu ka badnayd **10,150**. Waxaa sidoo kale Doorshada ku tartamay 7 urur-siyaasadeed, **3,775** murashax oo **1,065** ay dhedig ahaayeen halka **2,710** ay lab ahaayeen, waxaana codkooda dhiibtay **215,035** cod-bixiye. Sidookale Warbixintani waxay soo koobaysaa caqabadihii farsamo, kuwii siyaasadeed iyo casharadii laga bartay mudada doorashadu ay socotay.

Qabsoomidda doorashada goleyaasha deegaanka Puntland 2023 waxay ahayd hawshii ugu balaarnayd abid ee ka dhacda gayiga Puntland. Guddigu KMG ee doorashooyinka Puntland waxay bilaabeen u diyaargarowga doorashada horaantii bisha May, 2022 iyadoo laga duulayo guulihii iyo casharadii laga bartay doorashooyinkii horudhaca ahaa ee 25-kii October, 2021 ka qabsoomay degmooyinka Ufayn, Eyl iyo Qardho.

Si looga jawaabo casharadii laga bartay doorashadii horudhaca ahayd, guddigu waxay dib u eegis ku sameeyeen istaraatiijiyadaha, siyaasadaha maamulka iyo maareeynta, maaliyadda, qorshaha diiwaangalinta, Wacyigalinta, Hawlgalka doorashada, Tababaradda, habka dabagalka fulinta shaqooyinka iyo in la xoojiyo iskaashiga xiriirka saaxiibadda guddaha iyo dibaddaba. Talaabooyinkan waxay horseedeen in la tayeeyo hannaanka maaliyadeed iyo kan hawl-galineed ee hay'adda, lana dhiso xarumaha casriga ah ee Wacyigalinta (Call-center) iyo Diiwaan-galinta (VR Data Center).

Guddigu waxay balaadhiyeen xafiisyada TPEC oo la gaadhsiiyay ilaa **33** xarumood oo laga furay dhamaan degmooyinkii loo asteeyay in doorashadu ka dhacdo, waxaana loo qaatay hawl-wadeeno isugu jira guddoomiye, Xoghaye iyo shaqaale hoosaad kale. Sidoo kale waxaa xarunta dhexe lagu soo kordhiyay shaqaale u badan xirfadlayaal.

Muddadii ay hawsha doorashadu socotay, guddigu waxay xiriir joogta ah la lahaayeen ururadda siyaasadda iyaga oo lagala tashanjiray qorshayaasha iyo go'amadda masiiriga u ah qabsoomidda doorashada. Shirarka billaha ah ee guddiga iyo Ururada Siyaasadda waxaa lagu lafa-guri jiray xalinta muramadda ka dhashay sahamintii goobaha diiwaangalinta, diiwaan-gelintii cod-bixiyaha, aag doorashooyinka iyo cabashooyinka beelaha oo ahaa hawlo guddiga culays ku ah.

Bartamihii sanadka 2022 guddiga doorashooyinka waxa ay sidoo kale safar ugu baxeen gobolada si loo dar-dar geliyo shaqooyinka islamarkaana la tashiyo kala duwan loola sameeyo bulshada noocyadeeda kala duwan, waxaana deegaanadaas lagula kulmay dadweyne kala duwan si xog-waran la xidhiidha diiwaangelinta iyo doorashada loola yeesho.

Ugu danbayntii doorshada 2023 waxay kor u qaaday fahanka doorashooyinka ee muwaadiniinta Puntland iyo kan dad-waynaha soomaaliyeed, taas oo tusaale muuqda ay u ahayd sidii dadweynuhu ula socday maalintii doorashada. Guddigu waxa uu isticmaalay aaladaha baraha bulshada lagula socdo taas oo lagu ogaaday in 4,000 oo page oo isugu jira Twitter iyo Facbook ay wax ka qoreen doorshadii Puntland ee 25 May, 2023 halka ay daalacdeen in ka badan 20 milyan oo dhagayste oo caalamka ku kala nool.

2. WACYIGELINTA IYO TABABARADA




Iyadoo la raacayo qorshaha istaraatiijiyadda wacyigalinta, TPEC oo kaashanaysa hay'addaha ka qayb-qaata barnaamijyada wacyigalinta ee ka hawlgala Puntland ayaa la'isku dubariday dhamaan barnaamijyada wacyigalinta si loo tayeeyo saamaynta wacyigalinta. Waxaa la ururiyay dhamaan xogaha mashaariicda wacyigalinta islamarkaana loo qaabeeyey nidaam lagula socdo dhamaan (Outreach Matrix sheet). Muddadii u dhaxaysay August, 2022 ilaa May, 2023 waxaa lagu guulaystay in la fuliyo dhamaan hawlihii qorshaysnaa ee wacyigalinta. Guddigu

waxa uu ku dadaalay in barnaamijyada wacyigalinta si waxtar leh loo fuliyo loona gaarsiiyo bulshada inkastoo mashaariicda wacyigalinta ee lagu taageerayay doorshooyinka goleyaasha deegaanku ay aad u yaraayeen. Wacyigelintu waxaay iskugu jirtay mid guud oo diirada lagu saarayo shuruudca, xuquuqda codbixiyaha, shuruudaha diiwaangelinta, habka diiwaangelinta, habka doorashooyinka qof iyo cod ka ah iyo doorka codbixiyaha ee hannaanka doorashoyinka.




TPEC waxa ay heshiisyo shaqo iyo baahineed la gashay Idaacadaha ka hawlgala Puntland si ay u gudbiyaan fariimaha wacyigelinta, Degelada Baraha bulshada ee ay dadka badan ku xidhan yihiin, iyo TV-yada Puntland ka hawl-gala, kuwaas oo si toos ah fariimaha Guddiga u gaadhsiiinayay bulshada. Maalintii doorashada kaliya waxa Facebook & Twitter kala socday doorshadda Puntland malaayiin ruux oo daafaha caalamka kala socday sida daaha furan ee ay u dhacaday doorshadu. Tiradaas oo lugu ogaaday nidaamka casriga ee guddiga u adeegsaday hirgalinta doorshada oo ay ka mid ahayd in la isticmaalay Social Media Monitoring Tools.

2.1 Falanqaynta Aaladda facebook maalintii Doorashada



2.3 Falanqaynta Aaladda Twitter maalintii Doorashada



2.4 XARUNTA WICITAANKA DADWEYNAHA




Guddida Doorashooyinka TPEC waxay sameeyeen xarunta wicitaanka iyo hagidda dadwaynaha oo loogu talo galay inay qayb weyn ka qaadato barnaamijka wacyigelinta. Xaruntan oo la furay bishii Decembar 2022 waxaa ka shaqo bilaabay 16 shaqaale ah, waxayna maalin walba shaqaynasay 16 saacadood iyadoo noqotay xog-baahiyaha ugu muhiimsan wacyigelinta, ee maalinkasta fariimo cod, qoraal iyo wicitaan ah ku gaadha dadwaynaha Puntland, waxayna fududaysay in miyi iyo Magaalaba la gaadhsiiin karo wacyigelinta.

| CALL CENTER CALLS AND SMS | |
|---------------------------|--------------|
| SMS CAMPAING | 1,494,938.00 |
| INBOUND CALLS | 330778 |
| ANSWERS CALL | 220223 |
| AGENTS | 730 |
| NOT ANSWERS | 324 |

Xubnaha sare ee Guddiga waxay caasuumad tababar caalamiya ka heleen dawladda Switzerland halkaas oo ay safar ugu baxeen caasimadda Geneva, sidoo kale guddomiyaha guddiga iyo xoghayha guud waxay korjoogto ku tageen doorashadii dalka Sweden ka dhacaysay 11-09, 2022.

Guddida Doorashooyinka Puntland waxaay dajiyeen qorshe lagu hawl-galinaayo shaqaale tiro badan oo ka hawl gala xarunta dhexe ee Guddiga, Xafiisyada Gobolada iyo Degmooyinka, goobaha diiwaangelinta iyo codbixinta kuwaas oo iskugu jiray kuwa joogta ah, kuwo ku meel-gaadh ah iyo kuwo xirfadleyaal ah.



3. SAHMINTA IYO QIIMAYNTA GOOBAHA




Doorasho kasta waxaa muhiim u ah in la helo soohdimaha degmo doorashooyinka, goobaha diiwaangelinta iyo codbixiyayaasha ee dadweynuhu iska diiwaangelin doonaan wakhtiga diiwaangelinta, isla markaana codkooda ka dhiiban karaan maalinta codbixinta. Shaqada sahminta iyo qiimaynta goobuhu waxa ay sees u ahayd hawsha baaxadda wayn ee doorashada.

Bishii October 2023 ayaa Wasaaradda Arrimaha Guddaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyaynta Puntland u soo gudbisay Guddiga KMG Doorashooyinka Puntland liistada goobaha iyo xuduudaha degmooyinka oo dhan si Guddigu uu u sahmiyo.

Ujeedada qiimeynta iyo sahamintu waxay ahayd;-

- ⇒ in la soo ururiyo xogaha muhiimka ah ee goobaha iyo degmooyinka Puntland ee guddigu u bahan yahay si loogu adeegsado go'aamada iyo qorsheynta doorashada ,
- ⇒ In la soo hubiyo in goobaha la soo gudbiyey ay ku nool yihiin dad ku filan in loo abuuro goob doorasho
- ⇒ In dadweynaha ku dhaqan Puntland degmo kasta Guddiga doorashadu la soo kulmo lana gaadhsiyo xogta wacyigelinta doorashada iyo diiwaangelinta
- ⇒ In xogta rasmiga ah ee goobta noqonaysa goob doorasho lasoo diiwaangeliyo, sida Magaca, tilmaanta, xogta juqraafi (GIS) iyo muqaalka goobta iyada oo la adeegsanaayo agab casriya.

Qiimayn iyo sahamin uu guddigu ku tagay gobollada iyo degmooyinka Puntland, 17kii November 2022 ayuu Guddigu shaaciyay liistada goobaha diiwaan-gelinta iyo codbixinta oo ka kooban 9 Gobol, 37 Degmo doorasho iyo 524 seejo (*waxaan diiwaan gelin ka dhicin seejooyinka Gobolada Sool iyo Cayn*).



Qariiradda Degmooyinka la qorsheeyay

Gobollada, Degmooyinka iyo seejooyinka doorashada

4. DIIWAAN-GELINTA MUWAADINIINTA











Horaantii sanadka 2021 guddigu waxa uu diyaariyay Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha waxuuna adeegsaday diiwaangeelinta cod-bixiyeyaasha ee ku dhisan hannaanka Biometric oo ka kooban sawirada wajiga iyo bu'da isha (face and iris recognition) kaas oo loo doortay, in uu yahay mid kamid ah noocyada ugu casrisan qalabka diiwaan-gelinta, isla markaana aanay qofna suurto gal u ahayn in uu is diiwaangeliyo wax ka badan hal mar. Guddiga Doorashooyinka ku-meel-gaarka ah ee TPEC waxay sanadkii 2021-kii si hordhac ah u diiwaan-geliyeen muwaadiniinta degmooyinka Qardho, Eyl iyo Ufayn si looga barto

casharo loogana sii digtoonaado caqabadaha iman kara. Saddex-da degmo waxaa iska diiwaangeliyey codbixiyayaal dhan 48,353.

Sanadkii 2022 ayaa dib loo bilaabay in la sameeyo diiwaangelin buuxda oo wada gaadha dhammaan degmooyinka Puntland ka hor doorashooyinka goleyaasha deegaanka. Waxaa la soo dhamaystiray lana rakibay dhamaan agabka Diiwaangelinta.

sidaas oo kale waxaa tayeyn iyo kor u qaadis lagu sameeyey hannaankii diiwaangelinta iyo software kii lagu shaqeynayay si loo saxo wixii casharo ah ee laga bartay diiwaan-gelintii saddexda degmo.

Diiwaan-gelinta cod-bixiyuhu waxay bilaabatay 5-tii Janaayo 2023 waxayna soo gabagabowday 15-kii Maajo 2023 iyadoo goobaha diiwaan-gelintu ay ahaayeen 475 goobood (*waxaan diiwaangelin ka dhicin Gobolada Sool iyo Cayn*) halka wadarta muwaadiniinta is-diiwaan-gelisay ay ahaayeen 401,120 cod-bixiye.

| AGABKA DIIWAAN-GELINTA COD-BIXIYEYAASHA CASRIGA AH | | |
|--|--|---|
| Lm. | Nooca Qalabka | Calaamad |
| 1. | Laabtoob (labtob), |  |
| 2. | Kaamiro (webcam) |  |
| 3. | Iugaha kaamirada iyo laambadda (tripod and lamp) |  |
| 4. | Kaamirrada Indhaha ah (Iris camera) |  |
| 5. | Daabace (Printer) |  |
| 6. | Cajalad kayd (Flash drive) |  |
| 7. | Qaybiye (USB hub) |  |
| 8. | Sanduuqa Adag |  |


Guddiga Doorashooyinku isaga oo ka duulaya baaxadda dhuleed, Wakhtiga iyo agabka la heli karo waxa uu dejiyey sadex waji diiwaangelined oo dhamaan gobolada Puntland looga samaynayo Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha doorashada goleyaasha deegaanka Puntland 2023 sida ka muuqata jaantuskan hoose:-

| WAJIGA 1AAD | | | | |
|--------------|-------------------------|-----------------------------------|------------------|---------------------|
| GOBOLKA | GOOBAHA DIIWAAN-GELINTA | WADARTA GUUD EE ISDIIWAAN-GELISAY | WADARTA ANSAXDAY | WADARTA AAN ANSIXIN |
| Bari | 108 | 102,954 | 99,335 | 3,619 |
| Karkaar | 40 | 49,798 | 47,168 | 2,630 |
| Raascasayr | 35 | 14,255 | 14,196 | 59 |
| TOTAL | 183 | 167,007 | 160,699 | 6,308 |


| WAJIGA 2AAD | | | | |
|--------------|-------------------------|-----------------------------------|------------------|---------------------|
| GOBOLKA | GOOBAHA DIIWAAN-GELINTA | WADARTA GUUD EE ISDIIWAAN-GELISAY | WADARTA ANSAXDAY | WADARTA AAN ANSIXIN |
| Sanaag | 52 | 22,607 | 21,452 | 1,155 |
| Haylaan | 25 | 11,083 | 9,769 | 1,314 |
| Nugaal | 95 | 98,068 | 94,487 | 3,581 |
| TOTAL | 172 | 131,758 | 125,708 | 6,050 |

| WAJIGA 3AAD | | | | |
|-------------|----------------------------|--------------------------------------|---------------------|------------------------|
| GOBOLKA | GOOBAHA DIIWAAN-GELINTA | WADARTA GUUD EE ISDIIWAAN-GELISAY | WADARTA ANSAXDAY | WADARTA AAN ANSIXIN |
| Mudug | 120 | 102,355 | 100,687 | 1,668 |

Markii ay dhammaatay hawsha diiwaan-gelinta guddigu waxa uu bilaabay kala huffida iyo kaydinta xogta codbixiyayaasha waxa ayna soo saareen liistada codbixiyayaasha hordhaca ah tarikhdu markay ahayd 18 maajo, 2023 sida hoos ku cad:-



Xogta guud ee diiwaangelinta cod-bixiyayaasha hordhaca ah




Xogta gobollada diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha hordhaca ah

18 kii Maajo Gudigu isagoo tixracaya xeerka diiwaangelinta qodobkiisa 17aad wuxuu shaaciyey 7 maalmood oo lagu dhagaysanayo laguna saxayoo cabashooyinka la xiriiray Diiwaangelinta iyadoo Guddiga Xalinta cabashooyinka diiwaan-gelinta ay soo gaadheen cabashooyin isugu jiray:-


- ⇒ Muwaadin Goobta Codbixintu ka qaldantay,
- ⇒ Muwaadin Xogtiisa shaqsi ahaaneed ka qaldantay sida (Jinsiga, Magaca, Lambarka IWM)
- ⇒ Urur goob ama deegaan diiwaangelined cabasho ka qaba

- ⇒ Degmooyinka qaar oo ka caabanaya arimo la xiriira Soohdimaha Degmooyinka iyadoo gudigu u gudbiyey Hay'adaha Dawlada ay qusayso
- ⇒ muwaadiniinta qaangaarka ah oo da'doodu u dhaxayso 15-17 sano oo ka cabanaya in ay san helin xuquuq dooda codbixineed iyada oo xeerka diiwaan-gelintu ogolyahay da'da 18 sano iyo wixii ka wayn oo qura.

Kadib markii la xaliyey dhammaan cabashooyinkii soo gaadhay Guddiga Xalinta cabashooyinka 25 Maajo 2023 gudigu wuxuu si rasmi ah u shaaciyey liiska kama danbaysta ah ee codbixiyayaasha sida hoos ka muuqata;-



Xogta guud ee diiwaangelinta cod-bixiyayaasha Rasmiga ah



Xogta gobollada diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha Rasmiga ah

5. DAABACAADDA IYO QAYBINTA KAARARKA

Guddigu isagoo waayo aragnimo fiican ka haysta xiligii 3 dii degmo ee hordhaca ahayd wuxuu soo dhamaystiray dhamaan agabka daabacaada kaararka codbixiyaasha oo ku filan aadna tayadiisu u sarayso iyadoo lagu diyaariyey isla xarunta dhexe ee Guddiga goobo cayiman oo loogu talagalay.




27 Maajo, 2023 ayaa 21 hawl-wadeen oo isugu jira sadex waqti (shifts) si toos ah u bilaabeen Daabicista kaararka oo dhamaa 340,318 kaadh oo loo qorsheeyey in lagu dhamaystiro 30 beri. Kooxahan waxa ay shaqaynayeen habeen iyo maalin muddo 30 beri ah iyadoo hal-beega daabicista maalinlaha ahi uu ahaa 12,000 oo kaar cod-bixiye. Waxaa daabicista kaararka la soo gabagabeeyay 25-kii bisha Abriil, 2023.

Iyadoo laga duulayo isbedelka cimilada gobolada oo aan isku mid ahayn gaar ahaan Gobolka Bari magaalo madaxdiisa oo laga xagaabaxo xiliga kulaylaha ah, gudigu wuxuu go'aansaday in shaqada kaararqaybinta loo qorsheeyo si lamid ah qorshihii diiwaangelinta oo ahaa in Gobolada intii isku duruufa ah ama juquraafi ahaan isxigta laysu raaciyo iyadoo 24 Abriil ilaa 01-dii May, 2023 qaybinta kaararku ay si habsamileh uga bilaabatay dhamaan goobihii loo asteeyey kaarar qaybinta.

Dhamaan Goobaha Codbixinta waxaa kaarqaybintu ay ka socotay muddo 13 maalmood ah, halka Xarumaha Degmooyinka ay kaarqaybintu kasii socotay ilaa 18 may 2023, si dadka aan wakhtigii kaadh qaybintu ka socotay goobaha aan qaadan kaadhahka loo siiyo fursad labaad oo ay kaadhkooda cod-bixinta kaga qaadan karan xafiiska degmada ee Guddiga KMG doorashooyinka Puntland.

Kaararka la daabacay oo guud ahaa dhamaa 340,318 waxaa la qaybiyey oo baxay 319,507 (93.4%) kaadh waxaana soo haray 22,709 (6.6%) kaadh sida hoos ku cad.



6. QABSOOMIDDA DOORASHADA

6.1 OLOLAHA DOORASHADA

Guddiga Doorashooyinka waxa uu diyaariyay soona saaray shaxda isu-soo baxyada iyo dhoolo tusyada qorshaysan ee ururarada iyo mudada ololaha doorashada, kaas oo loogu qoondeeyay tiro maalmo ah oo isle'eg sida uu qeexayo Qodobka 23^{aad} ee Xeerka Doorashada Goleyaasha deegaanka. Ololaha Doorashadu waxa uu socday mudo 21 maalmood ah oo ka bilaamanaysa Isniin 1-dii bisha 5aad 2023 waxa uuna dhammaaday 21-kii bisha 5aad 2023. Guddigu waxa uu si joogta ah u kormeerayay habsami u socodka ololaha doorashada iyadoo ganaaxyo lagu fuliyay ururadii jabiyay anshaxa nidaamka ololaha ururada siyaasadda sida uu qabo xeerka doorashada qodobada 22^{aad} iyo 23^{aad} iyo jadwalka guddigu u dajiyay ololaha ururada. Jadwalka iyo maalmaha loo qoondeeyay isu-soo baxyada Urur-siyaasadeedyada waxaa loo kala helay qaab qori tuur ah oo ka kooban sadex wareeg sida ka muuqata shaxdan hoose:-

6.2 SHAXDA OLOLAHA URURADA SIYAASADDA PUNTLAND

| Maalinta | Urur Siyaasadeedka | Maalinta | Taariikh |
|----------------------------------|--------------------|----------------|-----------|
| OLOLAHA WAREEGA KOOWAAD | | | |
| Maalinta 1 AAD | RUNCAD | Isniin | 1/5/2023 |
| Maalinta 2 AAD | SINCAD | Talaado | 2/5/2023 |
| Maalinta 3 AAD | MIDEEYE | Arbaco | 3/5/2023 |
| Maalinta 4 AAD | SHAQAALAHA | Khamiis | 4/5/2023 |
| Maalinta 5 AAD | MUSTAQBAL | Jimce | 5/5/2023 |
| Maalinta 6 AAD | IFIYE | Sabti | 6/5/2023 |
| Maalinta 7 AAD | KA AH | Axad | 7/5/2023 |
| OLOLAHA WAREEGA LABAAD | | | |
| Maalinta 8 AAD | MIDEEYE | Isniin | 8/5/2023 |
| Maalinta 9 AAD | KA AH | Talaado | 9/5/2023 |
| Maalinta 10 AAD | SINCAD | Arbaco | 10/5/2023 |
| Maalinta 11 AAD | MUSTABAL | Khamiis | 11/5/2023 |
| Maalinta 12 AAD | RUNCAD | Jimce | 12/5/2023 |
| Maalinta 13 AAD | SHAQAALAHA | Sabti | 13/5/2023 |
| Maalinta 14 AAD | IFIYE | Axad | 14/5/2023 |
| OLOLAHA WAREEGA SADDEXAAD | | | |
| Maalinta 15 AAD | RUNCAD | Isniin | 15/5/2023 |
| Maalinta 16 AAD | IFIYE | Talaado | 16/5/2023 |
| Maalinta 17 AAD | MUSTAQBAL | Arbaco | 17/5/2023 |
| Maalinta 18 AAD | SINCAD | Khamiis | 18/5/2023 |
| Maalinta 19 AAD | SHAQAALAHA | Jimce | 19/5/2023 |
| Maalinta 20 AAD | MIDEEYE | Sabti | 20/5/2023 |
| Maalinta 21 AAD | KA AH | Axad | 21/5/2023 |

Isu-soo baxyada Urur-siyaasadeedyadu waxay u qabsomeen si xasiloon oo aan wadan wax rabshado ah.

6.3 LIISTOYINKA MUSHARAXIINTA IYO AAG-DOORASHOYINKA

Guddiga KMG Doorashooyinka Puntland oo tixgalinaya cabashooyinka Ururada Siyaasadda ee la xiriira liistada xiran ayaa soo saaray Habraaca Fasiraadda ¹²Liistada Xiran bishii Maarso, 2023 kaas oo uu ulajeedkiisu ahaa inuu Sharaxaad dheeri ah ka bixiyo hanaanka liistada xiran ee doorashada islamarkaana uu xaliyo caqabadaha Sharci iyo Farsamo ee doorashada. Habraacani waa mid farsamo ahaan, hab ahaan iyo faham ahaanba laga fikiray lalana kaashaday khuburo sharciyaqaan ah si fursad loo siiyo musharaxiinta haweenka ah iyo kuwa liistada kaga jira xagga danbe.

Guddiga Doorashooyinka ayaa siiyay Urur-siyaasadeedyada liistada Seejooyinka codbinta, muwaadiniinta iska diiwaan-gashay iyo tirada kuraasta degmo kasta. Urur-siyaasadeedyadu iyaga oo raacaya Habraaca Fasiraadda Liistada Xidhan, Shuruudaha Musharaxiinta Goleyaasha Deegaanka iyo Foomka Soo gudbinta Liistada Musharaxiinta ee uu guddiga doorashooyiniku diyaarayay ayay soo gudbisteen musharaxiintooda uga tartamaya Aagaga doorashada ee degmo kasta.

Kadib muddo laba asbuuc ah oo ay socotay hubinta iyo sixidda liistada musharaxiinta goleyaasha deegaanka Puntland 2023, guddigu waxa uu ansixiyay islamarkaana shaaciyay Liistada Musharaxiinta Goleyaasha Deegaanka 09-kii bisha May, 2023.



¹ Lifaafa seejooyinka Diiwaangelinta <https://pec.pl.so/wp-content/uploads/2023/03/03.-Degmooyinka.pdf>

² Lifaafa liistada xiran (https://pec.pl.so/wp-content/uploads/2024/01/Habraaca_liistada_xidhan_ee_Doorashooyinka.-1.pdf)

6.4 MAALINTA DOORASHADA



Guddiga oo tixraacaya sida uu qabo xeerka Doorashada qodobkiisa 6^{aad} wuxuu u asteeyey maalinta doorashada 25 May 2023 inay ka dhacdo 7 gobol, 33 Degmo iyo 478 Goobood oo aanay kujirin 3-dii degmo ee doorashada hordhaca ahayd ka qabsontay. Waxaa arimo farsamo darteed dib loogu dhigay 3 degmo Doorashadooda halka ay si buuxda uga dhacday 30 degmo.

Qabashada doorasho kasta waxay u baahantahay diyaarinta hawlaha udub-dhexaad ka u ah fulinteeda ku waa soo ay ugu horeeyaan (i) Agabka, Saadka iyo Gaadiidka (ii) Hawl-wadeenada (iii) Saraakiisha Amniga. Guddigu isaga oo ka duulaya maalinta Doorashada oo ku aadanayd 25-ka bisha May, 2023 waxa uu dhamaan hawlaha lagama-maarmaanka u ah doorashada dhamaystiray 10 maalmood ka hor maalinta doorashada.

25-kii bisha May, 2023 waxaa dhamaan seejooyinka doorashada ee 30-ka Degmo ay shaqada codayntu ka wada bilaabatay 6:00 AM aroornimadii. Shaqada codeyntu waxay soo gabagabowday 6:00 PM intabadan goobaha, balse waxaa jiray seejooyin ay dadku safafka ku jireen wakhtiga soo xirista codaynta ku waas oo loo shaqeeyay inta ay ka dhamaanayeen muwaadiniinta safka ku jira sida uu qabo Xeerka Doorashada Goleyasha Deegaanka.

Bulshada reer Puntland waxay codkooda u dhiibteen si nabdoon iyaga oo halku dhigoodu ahaa “Nabad Ku Codee” mana aysan jirin caqabado la soo tabiyay intii ay codeyntu socotay oo lid ku ah hanaanka codeynta iyo habsami usocodka doorashada ka qabsomtay 30-ka degmo iyo 398 Goobood.

6.5 KU DHAQAAQIDDA NATIIJADA

Tirinta codadku waxa ay bilaabatay 6:00 PM inta badan seejooyinka, waxaana loo maray hannaan daah-furan oo lagu tababaray hawl-wadeenada TPEC, Wakiilada Urur-siyaasadeedyada iyo Korjoogtada Maxaliga ah ee ka hawl-galaysay doorashada.

Seejeeyinka intii farsamo ahaan suurtagal ahayd waxa ay warbaahintu uga soo tabinaysay tirinta codadka tabinta tooska ah ee baraha bulshada iyada oo bulsha-waynta Puntland iyo daneeyayaashuba ay halkaas ka dheehanayeen habsami u socodka shaqada tirinta codadka iyo sida ay u kala heleen Urur-siyaasadeedyadu.

Marka ay soo gebagabawday shaqada tirinta codadka, Wakiilada Urur-siyaasadeedyada iyo hawl-wadeenda seejooyinka ee TPEC waxa ay si wadajir ah u saxiixeen naatiijada hordhaca ah ee goobaha iyada oo wakiil kasta ee urur-siyaasadeed uu qaatay nuqulka loogu talagalay ee xaashida natiijada. Ku dhawaaqista natiijada hordhaca waxa ay martay heerarka kala duwan oo kala ah (1) ku dhawaaqista natiijada seejooyinka (2) Ku dhawaaqista natiijada Degmooyinka (3) Ku dhawaaqista natiijada Gobollada iyo (4) ku dhawaaqista natiijada Xarunta dhexe ee guddiga.



26-kii Bisha may, 2023 natiijada goobuhu waxa ay soo gaartay xafiisyada degmooyinka halkaas oo looga dhawaaqay natiijada hordhaca ah ee heer degmo. 3-dii bisha June, 2023 Guddiga KMG ayaa si rasmi ah gacantaag ku ansixiyay natiijada hordhaca ah ee 30-ka degmo waxaana lagu baahiyay Website-ka, Barta Facebook-ga iyo Twitterka TPEC.

Muddada soo gud-binta cabashadu waxa ay ahayd **10** cisho waxaa xarunta dhexe ee TPEC iyo Guddiga xalinta khilaafaadka soo gaaray cabashooyin ka imaanayay Musharaxiinta tartamayay iyo Urur-siyaasadeedyada ku waa oo ay guddiga Xalinta khilaafaadka iyo Xarunta Dhexe ee TPEC ka jawaabeen lana xaliyay.

12-kii bisha June, 2023 Guddiga KMG Doorashooyinka Puntland ayaa sida ku cad Dastuurka Puntland iyo Xeerka Doorashada Goleyaasha Deegaanka ku wareejiyay gal-ka natiijada rasmiga ah Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland si ay u ansixiso natiijada kama danbaysta ah iyadoo ay Maxkamaddu ansixisay.




NATIJJADA RASMIGA AH EE DOORASHOYINKII GOLEYAASHA DEEGAANKA DAWLADDA PUNTLAND

Iskugeynta Natijada Doorashadii **Saddexda Degmo 2021**, iyo Doorashada **Soddonka Degmo 2023**



Sida loo kala helay kuraasta Golayaasha Deegaanka



info@tpec.pl.so

www.tpec.pl.so

tpec



©TPEC2023

31-dii Bisha July, 2023 Guddiga KMG Doorashada Puntland oo ka duulaya wax-ka-badalka Dastuurka Dawladda Puntland, Xeerka Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka iyo Xeerka Ururada Siyaasadda waxa uu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Sideed (8) Xisbi Siyaasadeed oo kala ah:-



1. Xisbi Siyaasadeedka **KA AH**
2. Xisbi Siyaasadeedka **MIDEEYE**
3. Xisbi Siyaasadeedka **SINCAD**
4. Xisbi Siyaasadeedka **IFIYE**
5. Xisbi Siyaasadeedka **MUSTAQBAL**
6. Xisbi Siyaasadeedka **SHAQAALAHA**
7. Xisbi Siyaasadeedka **RUNCAD**
8. Xisbi Siyaasadeedka **HORSEED**

7. AMNIGA, SAADKA IYO GAADIIDKA



Guddigu waxa uu horaantii sanadka 2022 diyaariyay qorsho hawleedyada Amniga, Saadka iyo Gaadiidka si loogu hawl-galo wareega doorashada sida Sahminta Goobaha, Diiwaan-galinta, Qaybinta Kaararka iyo Maalinta Codaynta.

Marka laga soo tago hawl-wadeenadii TPEC ee doorashada waxaa xusid mudan doorkii ciidamada ammaanka qaybahooda kala duwan ay ku lahaayeen doorashada. Goobkasta oo diiwaan-galin, Kaarar-qaybin ama Cod-bixineed waxaa ka hawl-galayay saraakiil ciidan oo sugayey amniga shaqaalaha, agabka iyo muwaadiniinta.

Gaadiidka doorashada loo adeegsaday waxa uu isugu jiray laba qaybood oo kala ah gaadiidka Xamuulka (lories) oo loogu talagalay in agabka lagu daabulo iyo gaadiidka yaryar (4x4) oo loo adeegsaday daabullida agabaka iyo hawl-wadeenada goobaha doorashada.

Baaxadda ka qaybqaatayaasha Wareegyada Doorashada waxaa soo koobaya jaantuskan hoose:-

| Ka qaybqaatayaashii Doorashada | | | | |
|---------------------------------------|------------|-----------------------------------|-------------|--------------|
| NO | Sahamintii | Diiwaangelintii iyo kaarqaybintii | Doorashadii | WADARTA GUUD |
| Shaqaalihii | 60 | 3,295 | 1,876 | 5231 |
| Gaadiidkii/Darawaladii | 20 | 699 | 1,950 | 2669 |
| Korjoogtadii | - | - | 520 | 520 |
| Saraakiishii amniga | 150 | 3,000 | 7,000 | 10150 |
| Wakiiladii ururada | - | 3,342 | 4,000 | 7342 |
| Musharixiinta | - | - | 3,775 | 3775 |
| Dad yaqaan/ Nabadoon | 33 | 99 | - | 132 |
| Wariyayaal/Tabiye | 13 | 353 | 520 | 886 |
| Wadarta | 276 | 10,788 | 19,641 | 30,705 |

8. ISKAASHIGA DANEEYAYAASHA DOORASHADA

Si loo xoojiyo wadashaqeynta daneeyayaasha doorashada, TPEC waxay dejisay qorshe wada shaqeyn, kaas oo suurto geliyey in guddigu bilkasta la kulmo daneeyayaasha muhiimka u ah doorashada, isla markaana lala wadaago warbixino iyo kolba halka shaqadu ay marayso. Guddiga doroashooyinku waxa ay jadwalka shaqo latashiyo kala sameeyeen islamarkaana la wadaageen daneeyayaasha kala duwan sida Ururada Siyaasadda, Dawladda, Ururada Bulshada Rayidka ah iyo Saxiibada Beesha Caalamka.



9. CASHARADII LAGA BARTAY DOORASHADA

Doorashadii 25-ka May, 2023 waxaa laga bartay casharo wax-ku-ool ah oo hortabin u leh doorashooyinka soo socda waxayna kala yihiin:-

1. ***Rabitaanka Dadwaynaha*** iyo baahida loo qabo hanaanka doorashooyinka tooska ah oo aad u sareeyay.
2. ***Fahamka Bushada*** oo aad uga sareeyay heerkii ay jooheen doorashadii hordhaca ahayd ee sadexda degmo.
3. ***Fasiraadda lagu sameeyay liistada xiran*** oo fududaysay daahfurnaanta tartanka musharaxiinta goleyaasha deegaanka.
4. ***Baahida loo qabo kooxaha guur-guura*** oo markasta saraysay iyo nidaamka diiwaan-gelinta casriga ah oo u baahan la qabsi deegaan iyo mid bulsho.
5. Muhiimada ay leedahay in loo kala jabiyo wajjiyo diiwaan-gelintii iyadoo laga ***duulayo baaxada iyo kala fogaanta dhuleed.***
6. ***Kalajabintii seejooyinka*** kabatay 1,000 codbixiye oo aad u sahashay habka codaynta

7. **Astaamaha uru-siyaasadeedyada ee waraaqda codeynta** oo loo badalay calaamado ay bulshadu aqoonsan karaan ayaa suurta galisay;-
- a. **Codadka xumaaday inay yaraadaan** marka la barbar dhigo doorashadii hordhaca ahayd ee sadexda degmo.
 - b. **Dadka reermiyiga ah ama aan wax qorin** inay si fudud u calaamadeeyaan waraaqda codeynta iyaga oo ka maarmay caawinaad.

10. CAQABADIHII DOORASHADA

1. **Muranno ka jiray soohdimaha goobaha doorashada degmooyinka:-** Caqabadani waxa ay saamayn ku yeelatay sahmintii iyo qiimayntii goobaha diiwaan-galinta iyo doorashada.
2. **Wacyi-galinta oo yarayd:-** dhaqaalaha wacyi-galinta iyo wakhtiga oo aad u yaraa labaduba waxa ay saamayn ku yeeshen qorshaha wacyi-galinta taas oo keentay inaan la gaarin deegaano badan.
3. **khilaafaadka siyaasadeed ee jiray:-** khilaafka siyaasadeed ee jiray wuxuu saamayn taban ku yeeshay habsami u socodka hanaanka doorashada gaar ahaan wacyi-geilinta, diiwaan-galinta, Hawl-gallada doorashada iyo inay doorashadu ka qabsoomi waydo sadexda degmo (**Garowe, Dangoroyo iyo Godob-jüraan**).
4. **Xeerarka doorashada:-** xeerarka lagu galay doorashada oo qadiimi ahaa ayaa caqabad ku noqday aragtiyada iyo heshiisyada ururada siyaasadda taas oo abuurtay in waqti badan la galiyo iswaafajintooda.
5. **Dhaqaalaha oo aad u koobnaa:-** Dhaqaalahii soo gaaray guddiga oo aad koobnaa marka loo eego hawlaha baaxadda leh ee horyaaley guddiga.
6. **In fasiraada habraaca liistada xiran** qodobkiisa 8^{aad} uusan sicaad u sheegayn hanaanka lagu bedelayo haddii xubin banayso booskeeda.

11. TALA SOO JEEDINTA

1. In Degmooyinka, Gobollada iyo deegaanadda Puntland ay u baahanyihiin kala xadayn iyo soohdimo loo sameeyo ka hor doorashada xigta.
2. In la dhamaytiro lana tifaftiro xeerarka iyo shuruucda doorashada iyaga oo laga qayb-galinayo bulshada qaybaheeda kala duwan.
3. Dhisidda kalsionida daneeyayaasha doorashada gudo iyo dibadaba.
4. In la Kordhiyo agabka Diiwaan-gelinta ka hor diiwaan-gelinta xigta.
5. In kor loo qaado fahamka iyo aqoonta xisbiyada siyaasadda iyadoo loo qabanayo tabbabaro.
6. In la kordhiyo miisaaniyadda guddigu ku shaqaynayo.
7. In la yareeyo khilaafyada siyaasadeed ka hor doorashooyinka.
8. In tababarro loo sameeyo goleyaasha deegaannada ee la doortay.
9. In la xoojiyo ka qayb-galka doorashooyinka ee bulshada qaybaheeda nugul sida Haweenka, Dadka laga tirada badanyahay iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba.
10. In diiwaan-galin buuxda laga sameeyo dhamaan deegaanada Puntland lana kordhiyo dadka ka qayb galaya doorashooyinka.
11. In kor loo qaado wacyigalinta dadwaynaha ee hanaanka doorashooyinka tooska ah.
12. In habraaca fasirka liistada xiran qodobkiisa 8^{aad} dib-sharaxaad loogu sameeyo

12. MILICSIGA DOORASHADA

Rubuc Qarni (25 sano) ka hor Puntland waxaa lagu aas-aasay Axdi Qarameed, kaas oo dhigayay in 3 sano gudahood lagu diyaariyo dastuur afti dadwayne loo qaaday islamarkaana doorasho qof iyo cod ah laga qabto gayiga Puntland. Mudadaas rubuc qarniga ah shacab waynuhu kama aysan raja dhigin in ay mar un doorasho qof iyo cod ahi ka qabsoomi doonto geyiga Puntland.

25-kii Bisha Octoobar, 2021 ayaa muwaadiniinta Puntland ee ku nool degmooyinka Qardho, Eyl iyo Ufayn u dareereen doorashadii ugu horeysay ee gole-deegaan taas oo hordhac u ahayd doorashada guud ee Goleyaasha Deegaanka lagana bartay casharo wax ku ool ah. Waxaa xigtay in 25-kii Bisha May, 2023 ay 30 Degmo si guul ah uga qabsoonto doorashada goleyaasha deegaanka oo loo qorsheeyay 37-da Degmo horraantii sanadka 2022.

1. **28 May, 2023 Madasha Wadatashiga Qaran Waxay Dowlada Puntland iyo Shacabka reer Puntland ba ku bogaadiyeen doorashadi qof iyo codka ahayd ee 30ka degmo.**

⇒ Golaha wadatashiga Qaran oo warsaxafadeed ay soo saareen 28 May, 2023 ku bogaadiyeen doorashadii taariikhiga ahayd ee ka qabsoontay 30 Degmo Puntland ee qof iyo codka ahayd 25kii May, 2023. Sidoo kale Golaha wadatashiga Qaran waxa ay sheegeen in loo baahan yahay in ay dawlad gobaleedyada kale ku daydaan Puntland oo ay dadajiyaan Qorshe doorasho si ay muwaadiintu u doortaan masuuliyiinta u adeegaya Bulshada. Golaha Wadatashiga Qaran waxay sheegeen in ay ahayd talaabo wanaagsan, oo ay tahay in lagu daydo.

⇒ Ugu daynbayntii Golaha wadatashiga Qaran ayaa ku baaqay in deegaanada aysan wali ka dhicin dorashada ay si nabad ah uga dhacdo.***Dowlada Federaalka Soomaliya, Dowlad Goboleedka Koofur Galbeed Soomaliya, Dowlad Goboleedka Jubbaland, Dowlad Goboleedka Hirshabeele, Dowlad Goboleedka Galmudug, iyo Maamulka Gobolka Banaadir***

2. **22 May, 2023 SAAXIIBADA BEESHA CAALAMKU WAXAY SHACABKA REER PUNTLAND KU BOGAADIYEEN DOORASHOYINKA TAARIIKHIGA AH**

⇒ Muqdisho - Ka hor doorashooyinka goleyaasha deegaanka ee Puntland ee dhacaya 25-ka Maajo, saaxiibada Soomaaliya ee beesha caalamka* waxay shacabka Dowlad Goboleedka Puntland ee Xubinta ka ah Dowladda Federaalka ku bogaadinayaan sida ay uga go'antahay inay ka mirodhaliyaan himmiladooda iyo ballanqaadyadooda dimoqraadiyadeed.

- ⇒ Saaxiibdu waxay qireen dadaallada, gaarka ah ee uu bixiyay Guddiga Ku-Meel-Gaarka ah ee Doorashooyinka Puntland (TPEC), si looga gudbo caqabadaha waaweyn ee horyaalla u diyaargarowga dhacdadadan taariikhiga ah ee doorashada tooska ah.
- ⇒ Saaxiibdu waxay ku dhiirigelinayaan dhammaan daneeyayaasha inay gacan ka geystaan xaqiijinta sidii doorashada loogu qaban lahaa jawi nabdoon, iyo in wax laga qabto su'aalaha ama khilaafaadka iman kara iyadoo loo marayo wadahadal iyo hanaanka sharciga.
- ⇒ Saaxiibadu waxay rumeysan yihiin in khibrada ay Puntland u leedahay doorashooyinka tooska ah ay wax bari karto oo ay dhiirigelin karto fidinta dimoqraadiyadda Soomaaliya oo dhan, ee heer kasta oo dowladeed. Saaxiibda waxaa weli ka go'an inay taageeraan hannaanka dimuqraadiyeynta Soomaaliya. *Hawlgalka Kalaguurka Midowga Afrika ee Soomaaliya (ATMIS), Belgium, Canada, Denmark, Jabuuti, Itoobiya, Wafdiga Midowga Yurub, Finland, Faransiiska, Jarmalka, Urur-Goboleedka (IGAD), Ireland, Talyaaniga, Boqortooyada Sacuudi Carabiya, Holand, Norway, Ururka Iskaashiga Dalalka Islaamka (OIC), Ruushka, Iswiidhan, Turkiga, Boqortooyada Midowday ee Britain, Dowladda Maraykanka, iyo Qaramada Midoobay*

13. Lifaaqa 1-Aad: SAWIRADA 2021

Diyaar-garowgii Doorashada, Sahamintii Seejooyinka iyo Diyaarintii qalabka




Tababarradii Hawl-wadeenada, Diiwaangalintii, Daabacaaddii iyo kaarar Qaybintii



kulamadii wacyi-gelinta, Shirjaraa'idyadii iyo kulamadii Ololaha Doorashada



Codaynta iyo Ku Dhawaaqista Natijada



14. LIFAAQA 2-AAD: BAHWADAAGTA GKDPL



Embassy of Switzerland




Puntland Development & Research Center



15. LIFAAQA 3AAD: JADWALKA DOORASHADA

Jadwalka Doorashooyinka Goleyaasha D. Puntland





HIMILO

In la qabto doorasho guud oo ka dhacda Puntland, taasoo abuurta kalsooni, korna u qaadaysa daacadnimada, isku-dhafka, cadaaladda, iyo hirgelinta hanaanka dimuqraadiga ah.

HIIGSI

GDP waxa ay hiigsanaysaa in ay awood siiso muwaadiniinta iyada oo u fududaynaysa doorashooyin xor ah, xalaal ah, oo lagu kalsoonaan karo oo kobcinaya dimuqraadiyeynta.

WIXII WARBIXIN DHEERAAD AH, FADLAN KALA XIRIIR:

Magaca hay'adda: Guddiga Doorashooyinka Puntland (GDPL)

Website: www.pec.pl.so

Email: pec@pec.pl.so

Facebook: Guddiga Doorashooyinka Puntland

Twitter: @PECPuntland

Address: jidka hal-bawlaha, ka soo horjeedka PDRC, Wadajir Garowe